



Noofambar 5, 2024,  
Degmadda Preor Lake-  
Savage Area School  
(PLSAS) waxaa la waydiin  
doonaa inay u codeeyaan  
aftida cashuurta ee  
shaqaynaysa taas oo  
xoojinaysa xasiloonida  
maaliyadeed ee  
degmada, ilaalinaysa  
waxaan haysano oo noo  
ogolaato in aan  
maalgelino tacliinta iyo  
badbaadada.

## Maxaa Ku Jira Codbixinta?

Haddii la ansixiyo, lacag dheeraad ah ayaa taageeri doonta maalgelinta barnaamijyada la socda Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee ay bulshadu xog-ogaal u tahay. Waxaan soo jeedineynaa waxyabaha soo socda si aan u taageerno korriinka iyo guusha arday kasta:

- Kor u qaadida heerka sare ee tacliinta taasoo kordhisa waxqabadka ardayga iyo natijjada
- Kordhi shaqaalaynta faragelinta akhlaaqda iyo taageerada ardayga
- Balaadhiso barnaamijyada jidka shaqada
- In la xoojiyo badbaadada iyo amniga dugsiyada oo dhan

## Isbarbardhingga Canshuurta Hawlgelinta Codbixiyuhu-Ansaxiyay (2023/24 ardaygii)

\$2,500.00

\$2,000.00

\$1,500.00

\$1,000.00

\$500.00

\$0.00



\* codee Nov.

Canshuurta PLSAS ee hadda jirta waa mid ka mid ah kuwa ugu hooseeya aagga, taas oo macnaheedu yahay degmadeenna waxay ka lacag yar tahay degmooyinka deriska ah si ay ugu shaqeeyaan dugsiyadeenna oo ay u siiyan ardayda barnaamij tartan leh.

## **Caqabadaha Miisaaniyadda**

PLSAS waxay wajaheysaa caqabado miisaaniyadeed oo halis ah, oo ay ku jiraan: Kor u kaca qiiimaha sicir bararka awgeed

- Waajibaadka aan la maalgelin
- Hoos u dhaca tirada dadka ee K-12
- Waxka bedelka maalgelinta gobolka oo aan ku filnayn

## **Sidaynu u Bixinno Lacagteena**

- **Barida iyo Barashada (80%)**  
Mushaharka iyo agabka waxbarashada
- **Adeegyada la iibsaday (12%)**  
Gaadiidka, gaaska, korontada
- **Kharashyada raasumaalka (5%)**  
Qalabka, dayactirka
- **Maamulka (3%)**  
Maamulka dhexe iyo maamulayaasha

### **PLSAS waxay si caqli gal ah u maamushaa cashuur bixiyayaasha Dollarka**

Qiimahayaga ardaygiiba wuxuu ku dhow yahay \$2,500 inuu ka hooseeyo celceliska gobolka, taasoo muujinaysa isticmaalka hufan ee cashuurta doolarka. Si kastaba ha ahaatee, tani waxay sidoo kale ka dhigan tahay inay naga maqan yihiin dhaqaalaha loo baahan yahay si loo hagaajiyo cabbirrada badbaadada, kor loogu qaado waxbarashada shakhsii ahaaneed, iyo ballaarinta dariiqooyinka shaqada ee ardayda, dhammaan mudnaanta ay aqoonsadeen qaar badan oo ka mid ah bulshadeena.

## **Saamaynta Hadii Aan La Ansixin**

Haddii cashuurta hawlgalka aan la ansixin, waxa lagama maarmaan noqon doonta in la sameeyo dhimis miisaaniyadeed oo weyn, taas oo ay u badan tahay inay ku jiraan: Xiritaanka hal ama in ka badan oo dugsi hoose ah taasoo keentay isbeddel xuduudeed Kordhinta tirada fasalka Dhimista shaqaalaha Yaraynta barnaamijyada ardayda iyo qaar kale

## **Saamaynta Cashuurta**

Haddii la ogolaado, saamaynta cashuurta ee celceliska mulkiilaha guriga (\$445,500 qiiimaha guriga dhexe) wuxuu noqon doonaa \$45 dheeraad ah bishii.



**Booqo:** [www.plsas.org/referendum](http://www.plsas.org/referendum)

**Email:** [input@plsas.org](mailto:input@plsas.org) **Wac:** 952-  
**226-0814**